



# TÜSŁA

An Ghníomhaireacht um  
Leanaí agus an Teaghlach  
Child and Family Agency

## Xirfadlaha Taageerada Qoyska (Family Support Practitioner)

Ka Hortagga, Iskaashiga iyo  
Tageerada Qoyska (PFSS)



Loogu talagalay carruurta iyo qoysaska  
**u baahan taageero**



# Yaanu nahay...

**Waxa aanu qayb ka nahay Tusla, Hay'adda Qoyska iyo Carruurta. Waxa aanu adeegyo taageero siinaa qoysaska ku jira waqtiyada adag ee walaaca badan. Waxa aanu qoysaska ka caawinaa inay xaaladaha adag si fiican uga soo kabtaan iyo horumarinta nolosha qoyska.**

Haddii aad danaynayso in aad nala shaqayso, adiga iyo carruurtaadaba waxaanu idinka taageeri doonaa la tacaalida walaacyada iyo horumarinta tayada nololeed ee qoyska si ay markaas carruurtaadu badbaado u helaan oo guulo wax ku ool ah nolosha uga gaadhaan.

Waxa aanu la shaqaynaa waalidiinta ka socda dhammaan bulshooyinka kala dhaqanka iyo asalka duwan iyo carruurtooda jirta illaa da'da 18 - laakiin keliya waa haddii ay waalidku rabaan inaanu sidaas sameyno.



# Sidda aanu u shaqayno...

- Waxa aanu ahmiyad badan siinaa waxyaabaha iyo meelaha qoyskaagu ku xooggan yahay ee si fiican u socda.
- Waanu ku taageeraynaa oo ku dhiirigelin doonaa muddada lagu jiro xilliyada adag.
- Waxa aanu dhiirigelinaa in qoysasku xiriiro fiican wada yeeshaan.
- Waxa aanu gacan ka gaysanaa horumarinta qabashada hawlaha guriga, xaadiritaanka dugsiga iyo maaraynta lacagaha.
- Waxa aanu kaa caawinaynaa sidii aanu kuugu xidhi lahayn taageerooyinka kale ee ka jira xaafadaada.
- Waxa aanu la shaqaynaynaa adiga, ilmahaaga iyo ciddii kale sida dugsiga, kalkaalisada caafimaadka ee dawladda iyo adeegyada caafimaadka maskaxda si ay arrimuhu uga soo reeyaan.
- Waxa aanu dhiirigelinaa hawlaha qoyska iyo horumarinta waxbarashada.
- Waxa aanu kor u qaadnaa dhaqanka Meitheal. Meitheal waa qaab aanu adiga iyo qoyskaaga ula shaqaynayno si aanu u dhiirigelino awoodihiina una aqoonsano baahiyihiina.

## **Waxyaabaha aad ka filan karto Xirfadlahaaga Taageerada Qoyska**

### **WAXA AANU**

*Ku shaqayn doonaa si waafaqsan karaankaaga.*

---

*Kuu sheegi doonaa cidda aanu nahay iyo waxa aanu qabano.*

---

*Ku noqon doonaa daacad.*

---

*Sirtaaada u ixtiraami doonaa si waafaqsan Tilmaamaha Mudnaansiinta Carruurta, Xeerarka Guud ee Ilaalinta Xogta.*

# Sidda aad noo caawin karto...

**Waxa aad naga caawin kartaa inaanu taageerada saxda ah ku siino xilliga ku habboon.**

- Noo sheeg walaacyadaada ku saabsan ilmahaaga iyo qoyskaaga.
- Noo sheeg waxyaabaha sida fiican u shaqaynaya si arrimuhu u sahlanadaan.
- Noo sheeg waxa aad jeclaan lahayd inay sidan ka fiicnaadaan iyo sida aanu kaaga caawin karno.
- Noo sheeg ciddii kale ee hadda qoyska iyo carruurta u muhiimka ah ama waxtarka u leh.



# Su'aalaha badanaa la iswaydiiyo

Miyaad imanaysaan gurigayga?

**Inta badan waxa aanu qoysaska la shaqaynaa iyaga oo guryahooda ama xaafadahooda jooga.**

Maxaa dhacaya haddii aanan u baahnayn tageero qoys?

**Waa go'aankaaga. Taageerada qoyska waxa aanu ku siinaynaa keliya haddii aad aqbasho in aad nala shaqayso.**

Adeega Taageerada Qoyska ma ka codsan karaa taageero?

**Haa waad la xidhiidhi kartaa si aad ugala hadasho baahiyahaaga taageero, si aanu u eegno waxa aanu qaban karno.**

## Waxa ay waalidiinta kale ka yidhaahdeen adeega


*"Marka ay wiilashaydu guriga kaga qaybqaateen hawlaha qoyska, waxay taasi noqotay mid na midaysa oo naga caawisay inaanu aqoonsano xaaladaha wiilashu wajahayaan."*

*"Xirfadlaha Taageerada Qoyska (The Family Support Practitioner) isbeddel wayn bay ku sameysay wiilkayga yar... way fahamtay. Waan odhan karaa waxa aan dareemayo... Xoriyad badan baan dareemayaa."*

*"Waxay iga caawiyeen in aan guriga ka baxo oo waxay isoo tuseen dhammaan waxqabadyada ama ciyaaraha dibadda ka jira."*

*"Waxay iga caawiyeen maaraynta dakhligayga, dabeecadayda oo waxay i siiyeen xirfadaha la qabsiga xaaladaha. Waxa ay iga caawiyeen inaan waqtiyada adag si fiican u maareeyo oo la qabsado."*

Si aad wax badan tan uga ogaato, fadlan la xidhiidh:



Si aad wax badan uga barato, booqo:  
Websaydka Perentin 24/7:

 [www.parenting24seven.ie](http://www.parenting24seven.ie)

CYPSC Website:

 [www.cypsc.ie](http://www.cypsc.ie)



**Rialtas na hÉireann**  
Government of Ireland



Arna chomhchistiú ag  
an Aontas Eorpach

Co-funded by the  
European Union



**An Roinn Leanaí, Comhionannais,  
Michumais, Lánpháirtíochta agus Óige**  
Department of Children, Equality,  
Disability, Integration and Youth

**TUSLA**

An Ghníomhaireacht um  
Leanaí agus an Teaghlach  
Child and Family Agency

Dukumeentigan waxa maalgeliyay CYPSC waxa ayna ugu talagaleen ESF+.

ESF+Action waxa si wadajir ah u maalgeliyay Dowladda Ireland iyo Midowga Yurub.

European Social Fund Plus (ESF+) waa habka ugu muhiimsan ee Midowga Yurub dadka ku maalgashadaan, kaas oo awoodda saara horumarinta fursadaha shaqo iyo waxbarasho iyo sidoo kale dardargelinta wadajirka bulshada iyo la tacaalidda faqriga.

ESF+ waxa fuliya Waddamada Xubnaha ah oo kaashanaya Guddida Yurub oo halkan Ireland Hay'adda Maaraynta ESF+ ee ka tirsan Waaxda Tacliinta Sare, Cilmibaadhista, Hal-abuurka iyo Sayniska ayaa ka masuul ah fulinta ESF+.



**Plain English**  
Approved by NALA

[tusla.ie](http://tusla.ie)



Si aad u hesho liiska  
Maamulayaasha  
Sare ee PPFS fadlan  
iskaangaree QR  
koodhkan.

